

Waalidiinta/Waardiyayaasha,

Sidii [aanu idin la wadaagnay Maayo](#), Guddida Iskuulka Degmada Toronto (TDSB) waxay ka codsan doontaa dhammaan qoysaska inay buuxiyaan Foomka Xulashada ee lagu kala xulanaayo Waxbarashada Tooska ah iyo ta Onlaynka ah ee sannad dugsiyeedka 2021-22.

Dhowrkii todobaad ee ugu dambeeyay, kiisaska COVID-19 ee Toronto waa ay sii yaraanayeen, waxaanaanu aragnay horusocod aad u fiican marka ay noqoto dhanka tallaalka dadka waaweyn iyo caruurta da'doodu udhaxayo 12-17. Kani waa wer dhiirri gelin leh, waxaanaanu usii han waynahay inaanu dib ugu xidhiidhino ardayda iskuuladii xaafadhooda iyo inaanu dib ugu soo dhawayno si shakhsi ah Sibtambar.

Inkastoo codsiyada Waxbarashada Onlaynka ah la samayn doono meelaha ay lagama maarmaanka tahay, waxa aanu si xooggan ugu dhiirri gelinaynaa dhammaan ardayda inay doortaan Waxbarashada Tooska ah. Annagoo ku salaynayna xogta TDSB ee ku saabsan sida ardaydu ay udareemayaan inay tahay sida ugu fiican ee ay wax u bartaan, iyo xogta diyaar ka ah ee khussaysa ardayda kusoo noqonaya Waxbarashada Tooska ah, waxa aanu ku kalsoonahay inay tani tahay xulashada ugu fiican ardayda ka dib sannad aad u caqabado badnaa.

Qoysaska waxa ay buuxin karaan Foomka Xulashada ee lagu kala xulanaayo Waxbarashada Tooska ah iyo ta Onlaynka ah si onlayn ah laga bilaabo **Khamiista, Ogoosto 5 illaa Khamiista, Ogoosto 12.**

limayl uu ku jiro linkiga Foomka Xulashada ayaa lasoo diri doonaa **Khamiista Ogoosto 5.** Qoysaska leh laba caruura iyo in kabadan waxa ay heli doonaan iimaylo kala duwan iyo linkiyo arday kasta ugaar ah. Qoysasku waa inay buuxiyaan Foomka Xulashada iyagoo isticmaalaya linkiga lala soo wadaagay.

Kuwa aan lahayn cinwaan iimayl oo uga diiwaan gashan TDSB waa la soo wici doonaa si ay u buuxiyaan Foomka Xulashada inta udhaxaysa Ogoosto 10 iyo 12. Ardayda waxaa la gelin doonaa Waxbarashada Tooska ah haddii aan lasoo buuxinin foomka Xulashada ka hor Ogoosto 12.

Waa aad ku mahadsan tahay la shaqaynta aad nala shaqaynayso innaga oo markaasi isu diyaarinayna si sannad dugsiyeedku innoogu bilaabmo si wacan.

Si aad xog dheeri ah u hesho, fadlan booqo www.tdsb.on.ca/School-Year-2021-22/2021-22-Selection-Form.